BADELIDA GOOBTA DEGAANKA

marka laguu geysto hatidaad iyo degaal dadka kuu dhow

Waxa laga yaabaa inaad caawimo ka heshay adeega bulshada si aad uga guurto kvinnojour ama hoy kale oo bedbaadsan? Dumar iyo carruur badan ayaa u baahan inay goobta degaanka bedelaan kadib hoyga bedbaadsan si ay ugu qorsheeyaan mustaqbal ay ka maqan yihiin hatidaado iyo degaal.

Qoraalkan yar waxa uu ku siinayaa macluumaad fursadahaaga aad ugu abuureyso mustaqbal ka amaan badan iyo waxa uu sharcigu dhigaayo ee masuuliyada adeega bulshadu ay ku caawinayaan qofka loo geystey dagaal uu goobta degaanka ugu bedelaayo.

Waxaad helaysaa macluumaadka lagala xidhiidho ALVA kvinnojour, kuwaas oo kaa caawinaaya dalabka iyo xidhiidhada kale ee dawlada. Halkan ayaa sidoo kale ka heli kartaa talo, taageero iyo in lagaaga jawaabo su'aalahaaga sida sharci dejinta loogu isticmaali karo.

Macluumaadku waxa ku socdaa qofka:

• loo geystey hantidaad iyo dagaal ee u baahan inuu abuuro mustaqbal ka amaan badan oo degaan kale ah ku yaala.
• ka shaqeeya kvinnojour ama hoy kale oo bedbaadsan oo la kulma dumarka la dagaalay iyo carruurtooda
• ka shaqeeya daaryeelka bulshada, daryeelka caafimaadka, dugsiga iwm oo rabba inuu ogaado waxay yihiin sharciyada iyo xeerarka shaqeynaaya marka la badalaayo goobta degaanka

Xeerka daryeelka bulshada 2 a Cutubka. 8 § qeybta 2

Xeerkan waxa uu soo baxay sanadkii 2011 si uu u taageero dadka loo geysto degaalka ama xadgudub kale. Xeerku waxa uu qofka siinayaa xaquuqda uu ku dalbanaayo taageero iyo caawimo, xataa guri, ee kamuunka uu rabbo inuu u guuro oo uu deggo.

Ayay sharciyada cusub khuseeyaan?

Ma jiro wax xeer ah oo cad, marka laga reebo in loo geystey dagaal. Xeerarku waxay khuseeyaan sida waafaqsan dhacdo kasta oo xog shakhsiyeedka qofka la ilaaliyo oo aanu kalidii dalban karin guri. Baahida carruurta ayaa gaar ahaan muhiim ah in la tixgeliyo.

Maxaan sameynayaa haddii aan rabbo inaan isticmaalo sharci dejinta?

Ka bilow inaad soo ogaato kamuunka aad rabto inaad u guurto. Malaha waxa wanaagsan inaad soo ogaato kvinnojour ka kamuun aad rabto inaad joogto? Malaha waxa jira sawir hatidaad ah oo taagan meelo ka mid ah Iswiidhan kuwaas oo keenaaya inaad u guurto meel kale?

Caawimo ka hel shaqalah aad aaminsantahay ama ALVA kvinnojour. Haddii ay booliiska ama adeega bulshadau sameeyeen qiimeyn khatartu intey leegtehay ah ayay wanaagsan tahay in taas laga shidaal qaato.

Dalabku waa inuu ahaado mid qoraal ah

Waa inaad dalabkaaga adeega bulshada ee kamuunkaaga aad rabto inaad u guurto ugu soo sameyso qoraal ahaan, xataa haddii dalab afka ah uu shaqeynaayo. Inta badan waxa wanaagsan in laga fikiro sababahaaga aad ugu baahan tahay inaad u guurto iyo meesha - qof shaqaale ah oo xaaladaada la socda caawimo ka raadso ama ALVA kvinnojour.

Go'aanka ka socda adeega bulshada

Waxaad markasta xaq u leedahay inaad go'aan qoraal ah ka hesho adeega bulshada. Haddii aanad ku qanacsaneyn go'aanka ayaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato.

Si racfaan laga qaato waa in taas lagu sameeyo qoraal ahaan iyadoo la sameyn doono 3 todobaad gudahood marka aad go'aanka heshan.

Si taxadir leh u akhri go'aanka, kalmadahaaga ku qor sababata aad uga soo horjeedo diidmada lagu siiyey iyadoo aad rafcaan ka qaadashada wakhti ku soo celineyso. Uma baahnid inaad sinaba u qaabeyso. Qor waxa aad dooneyso inaad tidhaahdo iyadoo aad xaaladaada sida ugu badan ee suurtogalka ah ugu sharaxeyso. Iska ilaali inaad guud marto sharxaadaada – oo si cad u qeex dareenkaaga iyo khibradaada, walibana bixi tusaalayaal.

Sidoo kale – caawimo weydiiso haddii aanad u baahan tahay!

Adeega bulshada ayaa kuu dalban kara sida waafaqsan (cutubka 2a. 10 iyo Tixraaca 11)

Adeega bulshada ayaa sidoo kale leh fursad ay iyagu laftoodu ugu dalbanayaa u wareejin kamuunka cusub ee aad rabto inaad ku noolaato. Haddii aad leedahay kaaliyaha bulshada oo aad isaga wadajir ula qorsheynayso, ayay wanaagsanan kartaa in caawmo laga helo wareejinta halka aad adigu kaligaa ka dalban laheyd kamuunka cusub.

Haddii kamuunka cusub aanu u soo jawaabin kaaliyahaaga bulshada hal bil gudaheed ama haddii labada kamuun aanay isla qaadan ayaa markaa kaaliyahaaga bulshadu wareejinta ka dalban karaa IVO (Inspektionen för vård och omsorg). IVO ayaa dhakhso go'aan uga qaadhi doonta, ugu danbeyn hal bil.

Miyaad rabtaa inaad wax dheeraad ah ogaato oo aad caawimo wax ku ool ah hesho?

ALVA kvinnojour ayaa baahinaaya aqoonta xaquuqda dumarka sida waafaqsan xeerka adeega bulshada marka laguu geysto hanjabaad iyo degaal qof kugu dhow ee aad u baahan tahay inaad goobta ad degantahay bedesho. Waxaanu rabnaa inaanu xoojino awood ay dumarku xaaladooda wax kaga badelayaan.

Waxaanu ALVA kvinnojour kaaga caawin karnaa foomamka dalabka, racfaan ka qaadashada ama qoraalada kale. Waxaanu sidoo kale tallo iyo taageero siinaa dadka kale ee ay khuseyso, sida kvinnojourer, adeega bulshada, daryeelka caafimaadka iwm.

Haka waaban inaad nala soo xidhiidho!

Waxaanu soo dhaweynaynaa in dadka caawiga iyo hay'adaha dawladuba la soo xidhiidhaan ALVA kvinnojour wixii macluumaad ah eee dheeraad ah talo ama taageero ah:

Tel: 0705-08 44 31

info@alvakvinnojour.se

www.alvakvinnojour.se

ALVA KVINNOJOUR

PROJEKT MED STÖD AV mucf.se
Myndigheten för ungdoms- och civilsamhällesfrågor